

Waa Maxay Galinta Tuubada Caloosha?

Tuubooyinka caloosha (g-tubes) waxaa la galiyaa iyadoo la isticmaalayo nidaamka loo yaqaan laparoscopy. Laparoscopy waa farsamo lagu sameeyo kamarad u oggolaanaysa bixiyaha inuu arko gudaha ubucda ilmaha. kamarada waxaa la galinaya meel yar oo la jeexo xudunta hoosteeda. Ka dibna, tuubo (g-tube) ayaa la galinaya.

Sida Galinta Tubada Caloosha u Caawiso


G-tubes waxay carruurta u baahan ka caawin karaan quudinta muddada dheer.



Avanos Mickey Button



MiniOnE Button ANT



Inta aad isbitaalka joogto

Filo 1 ilaa 2 habeen cisbitaalka inaad joogto. Waxaad ku tababaran doontaa daryeelidda iyo isticmaalka g-tube si aad u maamusho cuntooyinka iyo daawooyinka inta lagu jiro isbitaal jiifidda. Qof cunooyinka ku takhasusay ayaa kaa caawin doona xulashada nooca caanaha ku haboon iyo qiyaasta maalinkasta lasiinayo.

Dhammaan agabka loo baahan yahay si loo daryeelo tuubada iyo quudinta g-tube ka ayaa lagaa siin doonaa shirkadda qalabka caafimaadka (DME) ama shirkadda sahayda guriga ka hor intaadan isbitaalka ka bixin. Waxaa lagu siin doonaa macluumaadka meesha aad kala xiriir karto shirkadda DME, waxaadna awodi doontaa inaad dalbato sahay dheeri ah mustaqbalka markaad u baahato.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

Baxnaaninta iyo soo kabashada

Soo kabashada cunug kastaa way ka duwantahay kan kale, laakiin carruurta intooda badani waxay dib u bilaabaan heerkii dhaqdhqaaqii caadiga ahaa dhawr maalmood gudahood. Carruurta intooda badan, Tylenol (Acetaminophen) iyo / ama Motrin (Ibuprofen) ayaa ka kaafin doona xanuunka xilliga qalliinka ka dib. Daawooyin ka xoog badan ayaa la isticmaali karaa haddii loo baahdo.

Ku dhaq goobta g-tubeka maalin kasta saabuun iyo biyo laga bilaabo maalinta qaliinka ka dambeysa. Goobtaas looma baahna in la mariyo, looshan, kareemyo ama boomaato. ooma baahna goobta in la dhayo, laakiin hadii aad rabto waxaad isticmaali kartaa faashad. Ha'u ogolaanin in faashad qoyan ay sii saarnaato goobta, uga badal sida hadba loogu baahdo.

Tuubada xasili. Haddii quudinta ku socoto joogto ama wakhiyo isku xig xiga, isticmaal aalada xasilinta (securement device), sida Flexi-Track, si aad ugu hayso tuubada dheereynta caloosha dusheeda. Ka saar tuubada dheereynta oo dabool tuubada mar kasta oo tuubada aan la isticmaaleynin. Tuubooyinka lagu dheereeyo waa in lagu nadiifiyaa ugu yaraan maalin walba saabuun iyo biyo waana in isbuuc walbo la bedelo.



Flexi-Track Securement Device



Extension Tube

ilmahaaga waa in isbuunyo qoyan loogu qubeeyo ama biyaha dusha la iskaga shubo 2 da isbuuc ee ugu horeeya. Qubeyska baafka iyo dabaasha waa caadi 2 isbuuc kadib.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Waxaad u tagi doontaa rugta caafimaadka booqashada raad raaca isbitaal seexinta qalliinka kadib. Marka tuubadu ku jirto 3 bilood waxaad imaaneysoo rugta caafimaadka si loo beddelo tubbada. Waxaan idin baraynaa sida tuubada loo beddelo booqashadaas. Wixii intaas ka dambeeya, tuubada waxaa lagu bedeli doonaa qiyaastii 3 dii billoodba mar guriga ama rugta caafimaadka.

Haddii aad aragto qandho, guduudasho ama barar ka dhaca goobta GJ Tube ama maqaarka ku xeeran, waxaa laga yaabaa in tan ay calaamad u tahay caabuq. Wac TeleHealth 651-229-3890.

Waxa loo Fiirsado ka dib Markii la Galiyo G-Tube

Granulation Tissue (cad ku dul sameysma): Tani waa dhacdo caadi ah oo G-tube ka weheliso. Cad caafimad qaba ayaa kasoo baxa daloolka si uu daloolka u xidho. Wuxuu u muuqdaa casaan ama guduud, qoyan oo hilib xigeen ah, waxaana ka socda dhacaan qolof dahabi ah. Tani waxaa lagu qiimeyn karaa rugta caafimaadka waxana lagu daweyn karaa Silver Nitrate ama kareem Steroydh ah. Wac si aad ballan u qabsato.



Dheecaan: (jaalle, dahabi, bunni, cadaan) oo ka soo baxa tuubada g-tube ka waa la arki karaa waana dheecaanada caloosha ee caadiga ah, waa laga tirtiri karaa ama faashada laga beddeli karaa hadba sidii loogu baahdo.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Daadin: Tani waa dhibaato caadi ah badanaana is xadidda. Daadasho aad u badan micneheedu waxay ka dhigan tahay ilmahaagu mahelayo dareere iyo nafaqo ku filan. Haddii aad aragto daadasho, wac lambarka kalkaalsooyinka si aad ugala hadasho xeeladaha lagu yareynayo daadinta sida in aad hoos u dhigto quudinta iyo in aad tuubada neefiso. Haddii ay dhacdo daadasho, ka difaac maqaarka xanfaf adigoo marinaya zinc oxide (kareemka furuuraca xafaayadda) goobta tuubada, faashadna ku dabool meesha.

Ka saaridda tuubada: g-tube-ka wuu ka soo bixi karaa hadii buufinta haysa ay biyo lumiso ama hadii si kama ah loo soo jiido. Haddii tuubadu ay cusubtahay (in kayar 3 bilood jir) oo ay ka baxdo, buufinka aariyo bixi tuubadana daloolka ku celi. Tuubada ha ku qasbin daloolka. Buufinka dib ha u buufinin. Tuubada meesha ku koolee oo wac lambarka kalkaalsooyinka, waxayna kuu sheegi doonaan inaad ilmahaaga keentid qeybta gargaarka degdega ah ama xarunta caafimaadka ee Gillette si loogu sameeyo tuubo cusub. Haddii aan tuubo daloolka ku jirin si dhakhso leh ayuu u jufmayaa sidaas darteed dhakhso ku imow qeybta gargaarka degdega ah(ED).

Matag: Haddi bukaanka lasoo qaado ama isku dayo inuu matago, dabarka ka fur tuubada caloosha, ama badhanka taabo tuubada dheecaanka ee Bolus exhaust oo aan dabranayn si cadaadiska looga saaro loona oggolaado waxyaabaha caloosha ku jira in ay baxaan. Tani waxaa la yiraahdaa neefin. Haddii bukaanku leeyahay qalliinka hunguriga (Nissen fundoplication), waxaa muhiim u ah in la neefiyo G-tube ka haddii saxasho ama matag ahaan loo soo qaado ay dhacdo. Wac takhtarkaaga haddii saxashada ama soo qaadista matag ahaan joogsan waydo.

Xanuun: Haddii bukaanku xanuunsan yahay, quudinta iyo caanaha waxaa laga yaabaa in la bedelo. Weydii takhtarkaaga in ay wanaagsantahay in cunnada laga bedelo.

Xirmid: Haddii tuubadu ay xiranto, wac lambarka kalkaalsooyinka si aad u hesho tilmaamo. In tuubada xogaa biyo ah la raaciyo inta u dhaxeyso dawo iyo cunto siinta ayaa ka hor tagta in ay tuubada xiranto.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Quudinta iyada oo loo marinayo Tuubada Caloosha

Kahor quudinta, eeg oo hubi in calooshu madhantahay, haddii dhakhtarka bukaanka uu ku faray in la sameeyo ku dhaji silinge, u oggolow wixii ku jira caloosha dibadda inay usoo qulqulaan, adeegso awooda cuf-jiidka adoo geynaya silingaha meel ka hooseyso heerka caloosha ku taalo, ka dibna silingaha u qabo kor si waxa ku jira caloosha ugu noqdaan.

Si aad u hubsatid in tuubadu ay weli si ammaan ah ugu jirto, si tartiib ah dib ugu jiid tuubada ilaa aad dareentid iska caabin yar.

Haddii G-tube ka badhan yahay leh buufin la buufin karo, ha isku dayin inaad si ka duwan siduu yahay ula ekeysiiso adigoo wax ka badalaya biyahay buufinka. Arag bixiye caafiiamaad si sayska wax looga bedelo.

Meelaynta bukaanka

- Udhig qofka bukaanka ah boos raaxo leh, mid toosan ama yara janjeedho. Ilmaha yar waa in la saaro kursiga dhallaanka ama la hayo.
- Waxaa wanaagsan in aan la quudin qofka bukaanka ah, markii si siman uu ujiifo. Haddii loo baahdo u dhig dhinaca midgata.

Ka Neefsiga Tuunbada-G

Xirfadlaaga caafimaadku waxa uu kuu sheegi karaa inaad sii dayso (ka saarto hawada ama cuntada caloosha) kahor ama ka dib quudinta ama marka loo baahdo. Ku sii dayntan waxay caawisaayaraynta raaxo darada iyada oo la saarayo cadaadiska ku jira caloosha.

In lagu sii daayo caloosha iyada oo la adeegsanayo siriinji:

1. Ku xidhiidhi tuunbada dheer badhanka.
2. Ka saar afka baareelka ilaa siriinji ah 30-60ml.
3. Ku xidhiidhi baareelka siriinjiga si aad u balaadhisoo xidhmada oo aad u hayso siriinjiga 90° xagal ah oo sariirta bukaanka ah, ee caloosha sare.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

4. 4. Ka Furkordhinta tuunbada oo u ogolow wixii hawo ah inay marto. Waxa aad arki doontaa waxoogaa dareere kasoo baxaya; waa iska caadi.
5. 5. Marka aad jojiso Fudhfudha ee kasoo baxaya xadhiga ee siriinjiga, oo waxay u sahlaysaa dareera inuu ku noqdo tuunbada-g.
6. 5. Waxa aad ku shubtaa biyo.
7. 6. u bilaw ama usii wad quudinta sida caadiga ah.

Quudin Siinta

habka cuf-jiidka

- Ku dhaji silinge 60ml ah tuubada caloosha.
- Ka buuxi silingaha caanaha quudinta.
- Kor u qaad silingaha iyo tuubada 4 ilaa 4 3/4 inji meel ka sareysa darbiga caloosha.
- Si tartiib ah u quudi, oo qaadanaysa 20 ilaa 30 daqiiqadood.
- Dareeraha haray ka buuxi silingaha ka hor inta uusan madhanin, si looga hor tago in hawo caloosha gasho.

Habka bamgareynta

- Bacda quudinta ka buuxi qadarka la rabo oo dareere ah .
- Dhareeraha ku shub ilaa dhamaadka tuubada si aad hawada dheeraadka ah uga saarto tubbada.
- Ku xir tuubada tuubada kale ee caloosha.
- Daar bamka oo ka dhig heerka ay ku socoto _____ ml saacadiiba.
- Xaqiji in cunuggaagu uu yahay mid ammaan ah sida ugu macquulsan xiliga quudinta. Waxaad ka hortagi kartaa in si shil ah u saxdo ilmahaaga adigoo tuubada saaraya meel aanu gaari karin, kana fog madaxa, qoorta iyo garbaha inta ay ku xirantahay bacda quudinta.

Quudinta ka dib

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

- Ku dar _____ ml oo biyo ah bacda quudinta ama silingaha kuna celi nidaamkii quudinta oo kale si loo nadiifiyo tubbada.
- Ka fur silingaha ama tubaada oo dabool saar tuubada caloosha afkeeda.
- Bukaanku waa inuu fadhiistaa 30 daqiiqo kadib quudin kasta.

Daawooyinka

- Daawooyinka laga siinayo tuubada caloosha waa inay ahaadaan dareere, ama haddii uu dhakhtarkaada ansixiyey, loo burburiyo oo budo laga dhigo laguna milo dareere. Isku day inaad Ka ilaaliso dawo jadhiidh ah. Wuxuu ay jufi kartaa G-tube ka.
- Ku sii dawooyinka habka cuf-jiidka adigoo isticmaalaya silinge. Haddii uu yahay G-tube ka qaabka badhanka, isticmaal tuubada bolus extension si aad u siiso dawo la burburiyey. Ha u isticmaalin tuubada xagal toosan leh arrintan.
- Ku falaash 10 ilaa 30 ml oo biyo ah kadib markii aad dawo siiso. Takhtarkaaga ama kalkalisada ayaa kuu sheegi doona inta biyaha la isticmaalo ayadoo ku saleysan qiyaasta bukaanka iyo baahidiisa dareere.

Kooxda Daryeelkaaga

Bixiyeyaasheena daryeelka caafimaad halkan ayay kuu joogaan markasta xaalad kasta, ee marnaba haka waaban inaad nasoo wacdo.

Kooxda Qallinka Carruurta ee Gillette Meesha lagala xidhiidhi karo:

- Telehealth 651-229-3890
- Midwest Radiology 651-917-9330
- U of M Interventional Radiology 612-273-6378
- Children's Interventional Radiology 612-874-5399

Halkan ka daawo muuqaalka daryeelka tuubada caloosha gillette.mn/G-Tube ama Sawir QR koodhka.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Galinta Tuubada Caloosha

Gastrostomy Tube Placement and Care – Somali



This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.